SI AAN CADI AHAYN

IYADOO SABAB LOOGA DHIGAAYO

CUNSURIYAD

AMA

JINSIYADA ASAL AHAAN AAD KASOO JEEDO

Klagekomitéen for Etnisk Ligebehandling

INSTITUT FOR MENNESKERETTIGHEDER

WAA MAMNUUC IN SI KA DUWAN SIDA CAADIGA AH LAGUULA DHAQMO

Iyadoon loo eegayn meesha aad ka timi ama jinsiyada aad ka soo jeedo midna, waa in lagula dhaqmaa si wanaagsan.
Waana mamnuuc in si aan wanaag-sanayn laguula dhaqmo iyadoo sabab looga dhigaayo cunsurinimo ama asal ahaan meesha aad ka soo jeedo.

Waxaad u dacwoon kartaa gudiga dacwooyinka ee sinaanta dadka kala asalka ah ama jinsiyadaha kala duwan, hadi laguula dhaqmay si ay ka muu-qato kala duwanaasho.

WAXAAD U DACWOON KARTAA GUDIGA ARIMA-HA DACWOOYINKA EE QAABILSAN

QOLOOYINKA

KALA ASALKA/ JINSIYADAHA KALA DIWAN

HADII LAGUU

GEESTAY

AMA LAGUULA DHAQMAY SI KA DUWAN SIDA CAADIGA AH

WAA MAXAY AMA MUXUU MACNAHEEDU YAHAY IN SI AAN WANAAGSANAYN OO LAGUULA DHAQMAY?

Si aan wanaagsanayn oo laguula dhaqmo sababtoo ah guruubka aad ka tirsan tahay ama meesha aad ka soo jeedo taas macnaheedu waa si aan sharci ahayn (si xun) ama ka duwan sida loola dhaqmo dadkale ayaa laguula dhaqmay , taas oo sabab looga dhigaayo jinsiyadaada ama ka duwanaasho aad ka duwan tahay dadka intiisa kale.

Tusaale ahaan.
Shaqo bixiyahu kuuma diidi karo shaqo, isagoo sabab uga dhigaaya inaadan asal ahaan ka soo jeedin denmark.Cidna kuuma diidi karto inaad gasho golaha cawayska (diskotek), iyadoo sabab lagaaga dhigaayo midabkaaga, sidoo kale laguuma diidi karo in lagaa kireeyo aqal iyadoo sabab looga dhigaayo adigoo leh magac ajnabinimo ka muuqato. Dhamaan waxyaalahaasi hadii lagugu sameeyo waa qalad ama si aan caadi ahayn ayaa laguula dhaqmay

Laakiin si aan isku mid ahayn in laguula dhaqmaa sidaa waa ka badan tahay. Shirkadaha wax caymiya kuguma xujayn karaan inaad ku hadasho luqada deenisha si qalad la'aan ah , taasoo lagugu xiraayo si aad u sameysato caymiskaas.

Waxaa kaloo iyadana mamanuuc ah in lagu dhibo iyadoo sabab looga dhigayo cida aad ka sii jeedo, dadka laga badan yahay waa in loola dhaqmaa si la mid ah sida loola dhaqmo dadka kale oo waliba ixtiraam ku jiro. Tusaale ahaan hadii aad tahay arday macalinkaaga ama ardaydu kuma liidi karaan iyagoo sabab uga dhigaaya meesha aad ka timi ama kasoo jeedo.

Mamnuucistu waxay saamaynaysaa cidkasta ama qof walba, waliba waxaa kaloo mamnuuc ah in si aan wanaagsanayn laguula dhaqmo sababtoo ah maadaama aad ka tirsan tahay kooxaha aan asalkoodu ahayn seenishka.

Mamnuucistu waxay qusaysaa oo kale suuqa shaqada , tusaale ahaan -

- *Shaqaalaynta, shaqo ka ceyrin, shaqo ka badelid, iyo dalacsiinba.*
- *Mushaarka iyo shuruudaha shaqada*
- *Shaqo ahaan iyo waliba in waxbarasho loo diro dhaqaalaha*

Mamnuucistu waxay kaloo khusaysaa meelaha ka baxsan suuqa shaqada sida waxyaalaha hoos ku qora.

- *Daryeelka caafimaadka, dhakhaatiirta,dha khaartiirta arimaha lugaha,iyo kuwa cilmi nafsiga.iwm.*
- *Waxyaabaha bulshadu ka faaiido, latalinta arimaha bulshada, galitaanka*
- *Goobaha ay ka socdaan xarakaadkayaha sida ciyaaraha.iwm.*
- *Waxbarashada iskoolada, xarumaha waxbarashada dadka waaweyn. Iyo jaamacadaha iwm.*
- *Alaabaha iyo adeegyada , wax ka iibsashada dukaamada waa weyn, guryaha iyo gelitaanka makhaayadaha.iwm.*

GUDIGGA DACWOOYINKA (CABASHOOYINKA) EE SINAANTA DADKA KALA ASALKA AMA JINSIYADAHA DUWAN

Haddii laguula dhaqmay si ka duwan sida caadiga ah ayadoo ay sababtu tahay asalkaaga aad kasoo jeedo ama jinsiyad ahaan meesha aad ka timid awgeed, waxaad u dacwoon kartaa machadka xuquuqda bini'aadamka , gudigga cabashada ee sinaanta dadka kala jinsiyadaha ah.

Gudigga cabashada wuxuu baari doonaa arintaada, wuuna falanqeyn doonaa sida laguugu xadgudbay.

Waa inaad ogaataa hadii aad ka tirsan tahay ururada shaqada, ay gudiga dacwooyinku eegayaan oo kaliya hadii si khalad ah suuqa shaqada lagaalaga dhaqmay,hadii aadan wax caawimaad ah uga helin helin ururada shaqada arinkaaga,laakiin hadii adan ka ururada shaqaalaha waxaad si toos ah ugu soo dirsan kartaa inaad gudiga dacwooyinka.

Haddii aan soo helno ama soo ogaano in si ka duwan sida caadiga ah ee aan aheyn sida dadka loola dhaqmo laguula dhaqmay, waad dacweyn kartaa ciddii aad ka cabaneysid si aad xuquuqdaada u hesho.

Haddii aad u aragto in aysan xalismin arinkan wali, waxaad la aadi kartaa arinka maxkamadda. Arinkan oo kale waxaa lagu bilaabi karaan nidaam lacag la'aan ah, Sidaa darteed ma aha in aad bixiso qarashka ku baxa arin maxkamadeed.

SIDEE BAAD U DACWOON KARTAA (CABAN KARTAA)

Haddii aad dacwad inoo soo qoreysid, waa in aad ku soo qortaa;

- *Waxa dhacay.*
- *Sababta ay kuula noqotay in si ka duwan sida caadiga ah laguula dhaqmay, iyo*
- *cida aad ka dacwooneysid.*

Xussusnoow in aad ku soo lifaaqdid (dartid) cadaymaha ama waxii dukumenti ah ee aad heysatid , ee cawinayo ama taageerayo dacwadaada.

Hadii aad doonayso caawinaad si aad u dhiibati dacwadaada , waxaad soo waci kartaa telefoonka 32698945. Marka aan helno dacwadaada, waxaan iyadoo sawiran (koobi) ah u direynaa, cida aad ka dacwooneysid.

Haddii aad ka dacwootid si xun in laguula macaamilay, laguuguma sameyn karo wax cadaalad daro ah, ee daba socda in aad dacwootay awgeed.

Haddii gudigga dacwadu ay la noqoto ama ula muuqato, in arinku uu si waafi ah u cad yahay, waxaan u qaadanaynaa in si aan caadi aheen laguula dhaqmay oo ka duwan sida dadka loola dhaqmo asalkaaga ama jinsiyada aad ka tirsan tahay awgeed. Adiga iyo qofka aad ka dacwootayba , waxaad labadiinaba fariin ka helaysaan anaga, fariintaasoo ku saabsan arinka xalintiisa.

Ciwaanka dacwada : eeg bogga danbe.

U DIR DACWADAADA

Institut for menneskerettigheder
klagerkomitéen for
Etniskligebehandling
Strandgade 56
1401 København K

ama e-mail
klagekomite@humanrights.dk

Hadii aad u baahan tahay warbixin antaa ka badan waxaad usoo qori kartaa ciwaanada kor ku qoran ama waxaad soo baaqan kartaa bogga internetka

www.klagekomite.dk

waxaad kaloo soo waci kartaa telefoonka 32698945.